

NIDAAMYADA DHAGASIGA KU XAD GUDUBKA BARNAAMIJKA EE ULA KACA AH

Nidaamyada soo socda waxaa loo adeegsan doonaa dhagaysiga ku xad gudubka barnaamijka ee ula kaca ah ee foolka-foolka ah iyo taleefanka:

1. Waa inaad timaadaa cinwaanka laguugu sheegey Wargelinta Dhagaysiga shan iyo toban (15) daqiiqo kahor wakhtiga lagu balamiyay dhagaysigaaga si markaa adiga iyo wixii markhaatiyo ah loo fadhiisiin karo qolka dhagaysiga. Wakiilada hay'ada ayaa sidoo kale joogi doona qolka dhagaysiga. Hadii kani yahay dhagaysi taleefanka ah, waxaa lagu garan fadhiisiin doonaa taleefa sameecada leh, Xaakinka Sharciiga Maamulka (ALJ) ayaa lasoo hadli doona hay'adaada, oo wakiilka hay'ada ayaa ka jawaabi doona taleefanka oo shidi doona sameecada taleefanka. Hadii uu yahay dhagaysi foolka-fool ah, ALJ ayaa u iman doona si shakhsi ahaaneed si uu u qabto dhagaysiga.

2. ALJ way duubi doontaa dhagaysiga. Dhagaysigu shacabka uma furna, laakiin waxa aad u soo kaxaysan kartaa asxaab iyo qaraabo dhagaysiga hadii qolku uu ku filan yahay.

3. Labada dhinacba waxaa loo ogol yahay inuu hadal ka jeediyaan furitaan ah kaas oo lagu soo koobayo cadaymaha la filanayo inay soo bandhigaan. Bayaanka furitaanku maaha cadayn. Dhinac kasta waxa uu dooran karaa in aanu soo bandhigin bayaan furitaan ah.

4. Markhaatiyada hay'ada ayaa marka hore la dhagaysan doonaa. Markhaati kastaa marka uu hadlo, adiga, looyarka ama wakiilkaaga ayaa waydiin kara su'aalo markhaatiga. Tani waxaa weeye xuquuqdaada inaad waydiiso su'aalo. Waraaqo, waraaqaha, ama wixii kale waxaa la gelin doonaa cadaymaha. Waxa aad xaq u leedahay inaad diido wixii duwaano ah ee hay'adu ay isku daydo inay geliso cadaymaha. ALJ wuxuu go'aaminayaa hadii waxay lasoo bandhigay la gelinayo cadaynta.

5. Waxa aad xaq u leedahay inaad diido inaad ka jawaabto su'aalo inta uu socdo dhagaysigu. Hay'adi looguma yeedhi karo sidii markhaati oo kale inta uu socdo kiiskoodu iyada oo aad diyaar u tahay moojee inaad ka tanaasusho xuquuqdaada inaad aamusto.

6. Kadib marka hay'adu ay soo bandhigto dhamaan markhaatiyada, kadib waad ka hadli kartaa ama waxa aad dooranaysaa inaad aamusto. Waxaad sidoo kale keeni kartaa markhaati kale oo adiga macluumaadkaaga sheega. Hadii hay'ada uu matalayo looyar, markaa looyarka ayaa loo ogolaanayaa inuu adiga iyo markhaatiga su'aalo idin waydiiyo. Adiga, looyarka ama wakiilkaagu waxa aad keeni kartaan waraaqo, ama agab caymo ah. Looyarka hay'adu waxa uu diidi karaa cadaymahan oo ALJ ayaa go'aaminaya hadii loo ogolaanayo in duwaankaaga la geliyo cadaymaha. Hay'ada waxay footokobi ka samayn doontaa cadaymaha oo waxaa loo diri doonaa ALJ kadib dhamaysiga.

7. Labada dhinac waxay fursad u heli doonaan inay usoo bandhigaan bayaanka xidhitaanka ALJ. Bayaanka xidhitaanka laga gelinayo cadaymaha, laakiin waxaa weeye fursad labada dhinac ay ku sheegayaan sababaha ay tahay in ALJ uu dhankiisa u xukumo. Bayaanka xidhitaanka maaha inuu dhinacna jeediyo.

8. Kadib bayaanka xidhitaanka marka lasoo bandhigo, dhagaysiga waa lasoo gunaanadayaa. ALJ ma shaaciso go'aanka taariikhda dhagaysiga. Sida ugu dhakhsaha badan ee macquul ah dhagaysiga kadib ALJ waxay go'aanka rafcaankaaga oo qoraal ah kuugu soo diri doonaa boosta Xafiiska Rafcaanku.

9. Go'aanka ALJ ee aad gaadhay waxa uu noqonayaan Go'aanka Hore. Hadii aanad ku qancin go'aanka, weedha ugu danbaysa bayaanku waxay kuu sheegi doontaa sida aad uga qaadan karto rafcaanka ee aad ugu dirayso Xafiiska Rafcaanka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan nidaamka dhagaysiga, fadlan ka gal Hearings & Docketing - Boga nidaamyada ee websaytkeena: <http://www.colorado.gov/dpa/oac> oo raac linkiyada

Tilmaamaha Wixii Aan Looyar Ahayn iyo Nidaamyada Guud. Waxa aad sidoo kale heleysaa linkiyada shuruucda hay'adaha ee khuseeya ee kiiskaaga.

Cinwaanka boosta ee Xafiiska Maxkamada Maamulku waa: 1525 Sherman St, 4th Floor, Denver, CO 80203. Taleefan lambarku waa (303) 866-2000, oo lambarka faakiskuna waa (303) 866-5909.